# MAXKAMADAHA DHAGEYSTA DACWADAHA QAANSHEEGASHADA

---

## Wargelinta Dadweynaha

SOMALI TRANSLATION
Translated November 2009
Interpreter Services Program/SCO

**Daabacaadda Sideedaad**
**La Daabacay 2006**

Waxaa daabacay Maamulka maxkamadaha ee Ohio
oo gacan saar la leh Ururka Sharci yaqaanada ee Ohio

Buugyarahan waxaa loogu talo galay in laga helo macluumaad oo kaliya laakiin loolama jeedo in loo adeegsan karo talo soo jeedin dhinaca sharciga ah. Haddii aad dooneyso talo jeedin dhinaca sharciga ah, la xiriir sharci yaqaan (qareen).

Buugyarahan waxa uu aragti guud ka bixinayaa sharciyada iyo habka loogu adeegsado dhageysiga maxkamadaha qaansheegashada. Sharciyada u gaarka ah iyo habka ay u shaqeyso maxkamada deegaankaaga way ka duwanaan kartaa kuwa halkan lagu xusay. Maxkamadda degaankaaga weydii sharciga heer degaan ee u gaarka ah.

*Buug yarahan waa mid loogu talo galay dadweynaha waxaana si wadajir ah u soo wada saarey maamulka maxkamadaha ee gobolka Ohio, Ururka sharci yaqaanada ee Ohio iyo Maxkamadda degaankaaga iyagoo ugu tala galey adeegga dadweynaha loo soo saarey macluumaadka guud oo dadweynaha loogu talo galay. Waxaa daabacay isla markaana qeybiyey Maamulka Maxkamadaha Ohio*

*65 South Front Street, 4th Floor*
*Columbus, Ohio 43215-3431*
*Telefoonkooduna yahay: 614-387-9750 Fax: 614-387-9759*
*www.ohiojudges.org*



Somali (Translated November 2009)
Provided by the Interpreter Services Program of the Supreme Court of Ohio
The English version of this form and other information is available on the
http://www.supremecourt.ohio.gov/JCS/interpreterSvcs/forms

Xog sidahan yar waxaa loola jeedaa oo kaliya inuu macluumaad idiin soo gudbiyo. Ma aha talo soo jeedin dhinaca sharciga ah loomana qaadan karo. Haddii aad dooneyso talo soo jeedin dhinaca dharciga ah, la tasho sharci yaqaan. Waxaa dadaal badan loo maray sidii macluumaadka halkaan lagu soo bandhigey u noqon lahaayeen kuwo sax ah isla markaana ah kuwii ugu dambeeyey. Hase yeesshee, nidaamka ay ku shaqeeyaan maxkamadaha dhageysta dacwadaha qaansheegashada waa kala duwan yihiin, sida sharciga iyo habka ay u shaqeeyaan way kala duwan yihiin xilli xilliga ka dambeeya. Hubi markasta in aad haysato sharciyada ugu dambeeya ee ay ku shaqeeyaan maxkmadaha degaankaaga ee dhageysiga dacwadaha qaansheegashada iyo habka ay u hawl galaan si gaar ah kuwo khuseeya dhageysiga dacwadaada. Xogsidahan waa natiijo ka dhalatay hawlgal ay wadajir u fuliyeen dhawr qorayaal iyo saxayaal ah oo isu tagay. Daabacaadii ugu horeysay waxaa daabacay Ururka sharci yaqaanada ee Ohio sanadkii 1994kii. Daabacaadihii intaas ka dambeeyey waxaa dib ugu noqosho ku sameeyey qaaliyaasha, shaqaalaha caddaaladda, xoghayntooda iyo maamulka maxkamadaha oo ka kala yimid maxkamado kala duwan oo ku yaal gobolka Ohio. Daabacaddan ugu dambeysey waxaa saxay Ulf Nilsson ee goloha maamulka maxkamada ee Gobolka Ohio iyada oo ay gacan ka geysteen qaaliyaasha kala ah Qaali David Branstool, Qaali Gary Byers, Chris Cook, Qaali Susan Goldie, Qaali Thomas Herman, Qaali Mike Higgins, Qaali Thomas Januzzi, Qaali Mel Kemmer, Qaali William Lauber, Qaali Deborah LeBarron, Doug Lenhart, Qaali Elizabeth Mattingly, Qaali Steven McIlvaine, Qaali John Musson, Joseph Newlin, Qaali Deborah Nicastro, Qaali Dwight Osterud, Qaali George Parker, Eileen Pruett, Heydy Rapeport, Qaali Carol Robb, Beth Root, Qaali Ken Spanagel, Qaali John Street, Qaali David Sunderman, Qaaliga shaqada ka fariistey Qaali Mary Grace Trimboli, Barbara Valponi, iyo Qaali Judge Diane Vettori.

Xaquuqdu waa dhawrsan tahay (Copyright) 1994, 1997, 2001
Ururka Sharci yaqaanada ee Gobolka Ohio
Xuquuqda dhawrsoon 2006 (Copyright)
Golaha maamulka makamadaha ee Ohio iyo Ururka Sharci Yaqaanada ee Ohio

# Qodob muhim ah in la xusuusnaado:

**Macluumaadka ku xusan buug yarahan ma aha talo soo jeedin xagga sharciga ah oo uu bixinayo qof sharci yaqaan ah (qareen).**

**Shaqaalaha maxkamaduhu kuma siin karaa talo soo jeedin xagga sharciga ah.**

**Waa in aad ogaataa sharciyada iyo nidaamka maxkamadaha degaankaaga.**

**Sidoo kale waa in aad xasuusnaataa taariikhaha laguu qabto ee diiwaangelinta iyo dhageysiga dacwadaha.**

**Waa in aad ka soo baxdaa mas'uuliyadda ku saaran.**

**Waa in aad keydisaa nuqul ka mid ah dhamaan qoraalada aad ka diiwaan geliso maxkamadda.**

**Maxkamadaha dhageysata dacwadaha qaansheegashada waxa ay dhageystaan oo kaliya dacwadaha la xiriira lacago la isu heysto .**

## Tusmo


Hordhac........................................................................................................................ ...... ....................6

Maxay qabtaan maxkamadaha dhageysta dacwadaha qaansheegashada?........................ ...... .................6

Dacwadahee ayey dhageystaan maxkamadaha qaansheegashada?............................... .......... ...............6

Yaa laga dacweyn karaa ama ka dacwoon kara maxkamadaha qaansheegashada?............................................................................................................ ......... ................8

Xagee ayaan ka diiwaan geliyaa qansheegashadeyda?.................................................. ....... .................8

Sidee ayaan u diiwaan geliyaa dacwada qaansheegashadda?......................................... ........ ...............9

Imisa ayaan bixinayaa?......................................................................................... ............. ..............10

Intee in le’eg ayey qaadaneysaa?................................................................................. .................10

Dacwad ayaa la igu soo ogeey! Maxaan yeelaa?.................................................. ............ ...................11

Waa maxey dhexdhexaadintu?................................................................................ .............. .............13

Maxaa la yeelaa haddii la gaaro heshiis ka hor inta aan dacwada la dhageysan?......... ............. ..............13

Sidee ayaan u diyaarinayaa dacwadda?................................................................ .................. ............14

Maxaa dhacaya haddii aanan imaan dhageysiga dacwadda……………………......…..………......…..15

Maxaa la iga doonayaa inaan sameeyo dhageysiga dacwadda?......................... ...................... …..........16

Maxaan yeelayaa haddii anan qaaliga ku raacsaneyn go’aanka uu gaaro?............ ........... .....................17

Ka waran bixinta qaansheegashada?................………………………….………… .....…… .....……..18

Sidee ayaan ku helayaa lacagta la ii xukumay?....................................................... ........ .....................18

Sidee ayaan u heli karaa gargaar ku saabsan dhaqangelinta go’aanka maxkamadda?..... .... ...................19

Sidee ayaan ku ogaan karaa hantida qaameysanaha si la iigu xaraasho ama aan xuquuq ugu yeesho?.........................................................................………………......…......….............20

Sidee ayaan qeyb ugu yeelan karaa hantida qofka? Maxaase loola jeedaa?............... ............................ 20

Maxaan yeelayaa haddii aan doonayo gargaar ah in la iga gargaaro bixinta lacata la igu xukumey?.......21

Xagee ayaan ka heli karaa macluumaad dheeraad ah?............................. ...... ....................................23

Qodobo muhim ah in la xasuusnaado…......................................................................................24





Somali (Translated November 2009)
Provided by the Interpreter Services Program of the Supreme Court of Ohio
The English version of this form and other information is available on the
http://www.supremecourt.ohio.gov/JCS/interpreterSvcs/forms

## Hordhac

Buugyarahan waxa uu faahfaahin ka bixinayaa dhageysiga dacwadaha qaansheegashada ee gobolka Ohio. Waxaa loo diyaariyey kuwo doonaya in ay dacwad qaansheegasho ka diiwaan geliyaan maxkamadaha dhageysta dacwadaha qaansheegashada ama dhinac ka ah dacwad laga diiwaangeliyey maxkamadda.

.

Inkasta oo dadaal dheer loo galay dhageysiga soo gudbinta macluumaad sax ah ee ku saabsan maxamadaha dacwooyinka qaansheegashada, hadana waaxaa waajib kugu ah in aad la xiriirto maxkamadda dhageysaneysa dacwadaada ee gobolka Ohio. Waxaa suurto gal ah in sharciyada qaar wax iska bedelaan tan iyo intii buugyaraha la dhameystirey ama ay dhici karto inuu jiro farqi yar oo u dhaxeeya nidaamka maxkamaddu ku shaqeyso iyo kan halkan ku xusan.  Waxa aad u baahan tahay in aad ogaato sharciyada, nidaamka iyo kharashyada lagu bixiyo diiwaangelinta dacwadda maxkamadda degaankaaga. Waxaanu rajeyneynaa in buugyarahan ku siiyo macluumaad la xiriira sida ay u shaqeeyaan maxkamadaha dhageysta dacwadaha qaansheegashada iyo su’aalaha ku haboon in aad weydiiso maxkamadda degaankaaga.

Waxa kale oo aad maanka ku heysaa in qofkasta uu xaq u leeyahay inuu qareen qabsan karo, adiga iyo dadka dacwada kaaga soo horjeedana aad xaq u leedihiin. Inkasta oo inta badan ay haboon tahay inaad qareen leedahay, waxa aad u baahan tahay in aad tixgeliso kharashka kaaga bixi kara in aad qareen qabsato. Waxa kale oo kuu banaan in aad qareen la tashato inta aad xoogaa lacag ah siiso si aad ugu hesho talo munaasib ah.

## Maxey qabtaan Maxkamadaha dhageysta dacwooyinka qaansheegashada?

Sharciga gobolka Ohio waxa uu waajib ka dhigayaa in degmooyinka iyo dawladaha hoose ay abuuraan maxkamado dhageysta dacwadaha qaansheegashada, kuwaas oo loo yaqaan maxkamadaha dhageysta dacwooyinka qaansheegashada. (Tixraac cutubka 1925 sharciyada hab dhaqanka ee dib loogu noqday ee gobolka Ohio.) Ujeedooyinka maxkamadaha dhageysta dacwooyinka qaansheegashada waa in ay xaliyaan khilaafaadka yaryar ee dhex mara bulshada si cadaadalad ah, dhaqso ah isla markaana aanu kharash badan kaga bixin.
Habka ay ku shaqeeyaan maxkamadaha dhageysta dacwooyinka qaansheegashada waa mid ka fudud dhageysiga dacwooyinka kale. Dhageysigu waa mid la fududeeyey; ma jiraan xeer beegti, dacwooyinka waxaa go’aan ka gaara qaali ka socda dawladda hoose ama maxkamadda degmada ama “Qaaddi” mas’uul ka tirsan shaqalaha cadaaladda (sharci yaqaan aqoon gaar ah leh oo uu magacaabey qaali”; kharashka ku baxa dacwadahan waa mid aad ugu yar kan ku baxa dhageysiga dacwadaha kale. Maxkamada intooda badan waxa ay dacwadaha dhageystaan galab gaabkii waxaana suurto gal ah in maxkamada ku yaala magaalooyinka waaweyn ay xafiisyo faracyo ah ku leeyihiin xaafadaha dhexdooda.

Maxkamadaha dhageysta dacwadaha qaansheegashada oo aad u fudud darteed ayaa dadka dacwduhu dhex maraan ay kaligood iyaga oo aan wadan qareen ka qeyb qaadan karaan dacwadooda. Hase yeeshee, haddii qofku doonayo in uu qareen qabsado wuu yeeli karaa.

## Dacwadahee ayey dhageystaan maxkamadaha qaansheegashada?



Somali (Translated November 2009)
Provided by the Interpreter Services Program of the Supreme Court of Ohio
The English version of this form and other information is available on the
http://www.supremecourt.ohio.gov/JCS/interpreterSvcs/forms

Dacwadaha qaansheegashada waxa ay la mid yihiin adiga oo dacwad lagugu soo oogey, farqiga kaliya ee u dhaxeeya wa iyada oo lacagta la isku haystaa ay tahay mid yar taasoo u qalanta in ay maxkamadda kharash ku bixiso oo waqti geliso.

Maxkamadaha dhageysta dacwadaha qaansheegashada waxa ay xaliyaan khilaafadeed maaliyadeed oo lacagta la isku heystaa yar tahay ama ay tahay mid heer dhexe ah. Dacwadaha ay dhageystaan maxkamadaha qaansheegashada waxaa ka mid ah dacwad dhex taal kireyste iyo mulkiile si mulkiilaha looga soo celiyo lacagtii keydka aheyd ee kireystuhu bixiyey markii uu kireysanayey guriga, qaansheegashada mulkiilaha ee kirada aan la bixin ama dhibaato loo geystay gurigiisa oo uu magdhaw ku weydiisanayo, qaansheegasho dhex marta ganacsade qof ka iibiyey alaab haleysan ama aan shaqeyneyn, kharashyo aan la bixin oo waqtigoodiina la dhaafey, dhaawaca ka dhasha shilalka, cabashooyinka dhex mara shaqaalaha iyo loo shaqeeyaha, caruurta la isu hayo, iyo mushaaharaadka aan la bixin.

Waxaa jirta in ay xuduud leeyihiin dacwadaha la horkeeni karo maxkamadaha dhageysta dacwadaha qaansheegashada:

**1**. Waxa ay dhageystaan oo kaliya dacwadaha lacag la isu heysto. Maxkamaddu ma soo saari karto in banaanka la kala maro (aan la isla xiriirin), amar magan gelin ah, ma amri karto furriin, mana amri karto in qof uu soo celiyo hanti uu heysto. Maxkamadaha dhageysta dacwadaha qaansheegashada waxa ay dhageystaan oo kaliya dacwadaha lacag la isu heysto.

**2**. Lacagta la isu heystaa kama badnaan karto $3,000 (kuma jiro dulsaarka iyo lacag lagu dhiibey maxkamadda si dacwadadda loo diiwan geliyo). Lacagta la isu haystaa waa in ay ahaataa $3,000, lacagta qofka liddiga ku ah qofka dacwada diiwaan geliyeyna waa in ay sidaas oo kale ka badnaan $3,000 (dhinac kasta ama ayba ka yar tahay.

**3**. Marka laga tago inta ay le'eg tahay lacagta la isku heysto, maxkamadaha dhageysta dacwadaha qaansheegashada ma dhageystaan dacwadaha qaarkood, dacwadaha lagu codsanayo in dambiilaha ama qofka dhibka geystay la ciqaabo, dacwad ku dhisan qoraal ama sawiro la iska faafiyey, xanta iyo been abuurka, ama xadgudub loo geystay qofka dacwoonaya, dacwad uu soo oogey qof la wakiishey ama hay'ad qof wakiil ka ah (sida dacwad uu soo gudbiyey ceymiska isga oow akiil ka ah mid ah dadka uu ceymiska u fidiyey, hase yeeshee dawladdu dacwad way ku soo oogi kartaa shirkadaha ceymiska iyaga oo u maraya wakiiladooda).

**4**. Maxkamadaha dhageysta dacwadaha qaansheegashada ma xaliyaan waxna kama qabtaan dacwado liddi ku ah hay'adaha dawladda ee gobolka Ohio ama daawladda Mareykanka iyo hay'adaha ka tirsan dawladda Mareykanka.

Haddii aad wax su'aal ah qabtaan oo ku saabsan in dacwadaadu ay ka mid tahay kuwo kor lagu soo sheegay, waxa suurto gal ah in aad u baahato in aad qareen la tashato. Waxaa suurtomgal ah in shaqaalaha maxkamaddu ay ka jawaabi karaan su'aasha 1aad iyo tan 2aad, laakiin haddii wax shaki ah kaaga jiro tan 3aad waa in aad sameysaa la tashi.

Waxaa suurto gal ah in dacwooyin markii hore ka biloowday maxkamada dhageysta dacwadaha qaansheegashada **dib looga wareejiyo maxkamada dhageysiga dacwooyinka:**

Haddii dacwad ay ku bilaabato in ay tahay lacagta la isku heysto $3,000 ama ka yar laakiin marka dambe ay dib ka noqoto wax ka badan $3,000, dacwada waxaa loo wareejinayaa maxkamadaha madaniga ah ee ka tirsan dawladda hoose ama maxkamadda degaanka.



Somali (Translated November 2009)
Provided by the Interpreter Services Program of the Supreme Court of Ohio
The English version of this form and other information is available on the
http://www.supremecourt.ohio.gov/JCS/interpreterSvcs/forms

Hadii labada dhinac mid ka mid ah uu codsado, waxaa suurto gal in dacwada loo wareejiyo maxkamadaha madaniga ah ama maxkamada kale ee degmada.

## Yaa laga dacweyn karaa ama ka dacwoon kara maxkamadaha qaansheegashada?

Guud ahaan, qof kasta oo 18 sano jira ama ka weynba waa uu dacwoon karaa isla markaana dacweyn karaa. Dadka da'doodu ka yar tahay 18 sano waxa ay dacwadooda soo gudbin karan iyaga oo kaashanaaya waalidkood.

Shirkadaha waaweyn, dadka ganacisaga shirkada ah, ama noocyada kale ee ganacsiga waa ay dacwoon karaan isla markaana la dacweyn karaa. **Haddii aad tahay sarkaal ka tirsan ama madax ka ah gobaha ganacsiga ee kala duwan isla markaana ganacsigiina la dacweeyo ama uu wax dacweynayo, waa in aad la tashataa qareen inta aadan dacwadaada ka diiwaan gelin maxkamadda.** Waxa aad soo bandhigi kartaa caddeymo ku saabsan dacwadaada, laakiin lama doonayo inaad noqoto qof isagu dooda oo difaaca ganacsiga. Haddii aad maxkamadda uga doodo ama aad ka difaacdo ganacsiga aad ka shaqeyso waxaa suurto gal ah in aad ku xadgudbeyso sharciga adiga oo u adeegsanaya sharciga si aan sax ahayn – xitaa haddii waxa aad sameysay ay yihiin oo kaliya in aad buuxisey warqadaha iyo qoraalada maxkamadda.

Si aaney taas u dhicin, la xiriir qareen si aad u ogaato waxa aad sameyn karto iyo waxa aadan sameyn karin marka aad dacwad diiwaan gelineyso ay shirkadaadu dhinac ka tahay. Fadlan waxa aad maanka ku heysaa in shaqaalaha maxkamaddu aaney idin siin karin wax talo ah oo ku saabsan mowduucan.

Marka aad **dacwad ku soo oogto goob ganacsi ama hay'ad** waa in aad caddeysaa nooca ganacsiga ay tahay, in ay tahay mid qof leeyahay, mid la wadaago (shirko lagu yahay) ama shirkad weyn ah. Si aad u ogaato macluumadka waa in aad la xiriirtaa xafiiska maamulka ee gobolka Ohio ama la soo xiriir telefoonka 614-466-2655 ama soo booqo barta shabakadda internetka ee www.sos.state.oh.us. Waxaa kale oo aad ka ogaan kartaa xafiiska hantidhawraha gobolka kaas oo laga heli karo ogolaanshaha ganacsiga ama diiwaanhayaha gobolka kaas oo laga heli karo macluumaadka ganacsiga shirkada laga hayo.

## Xaggee ayaan ka diiwaangeliyaa dacwadda qaansheegashada?

Waa in aad dacwadaada ka diiwaan gelisaa maxkamadaha dhageystaa dacwadaha qaansheegashada ee maxkamadda degaankaaga ama xafiisyada dawladda hoose.

Si aad u ogaato maxkamadda aad ka diiwaangelineyso dacwadaada waxa aad tixgelneysaa labada shey ee soo socda:

**1**. Maxamadaha dhageysta dacwadaha qaansheegashada ayey dacwadaadu hoos imaneysaa haddii arrinta aad ka dacwooneyso ay ka dhacdey degaanka maxkamaddaasu maamusho.
**2**. Iyada oo aan la tixgelin meesha ay arrintu ka dhacdey. Maxkamadaha qaansheegashada ayey dacwadu hoos imaneysaa haddii qaameysanaha (qof ka ama goobta ganacsiga) dacwada lagu soo oogey ama mid ka mid ah qaameysanayaasha – haddii ay dad badan isugu jiraan uu ku nool yihiin ama xaruntiisa ganacsiga ay ku taal dhulka hoos yimaada maxkamadda dhageysta dacwadaha qaansheegashada.

Taas waxaa loola jeedaa in dacwadaada aad ka diiwaan gelin karto wax ka badan hal maxkamad. Haddii ay arrintu sidaas tahay, waa in aad doorataa maxkamadda aad ka diiwaan gelineyso.



Somali (Translated November 2009)
Provided by the Interpreter Services Program of the Supreme Court of Ohio
The English version of this form and other information is available on the
http://www.supremecourt.ohio.gov/JCS/interpreterSvcs/forms

Hubi oo daraasad ku samee dhulka ay maamulaan maxkamadaha dhageysiga ee aad ka diiwaan gelin karto dacwadaada adiga oo is weydiinaya In goobaha kor ku xusan ee 1aad iyo 2aad ay yihiin dhulka hoos yimaadka maxkamadda xuduuda ku leh. Ka diiwaangeli dacwadda maxkamadda laga maamulo degaanka aad dacwada ka diiwaan gelineyso.

### Sidee ayaan u diiwaan geliyaa dacwadda qaansheegashada?

Dacwada qaansheegashada waxa aad ku bilaabeysa adiga oo qoraal dacwadeed ka diiwaangeliya maxkamadda dhageysata dacwada qaansheegashada. Qoraalkaagaas waa in ay ku cad yihiin faahfaahinta iyo qaabka qaansheegashada. Waxaa sidoo kale aad ku caddeyn kartaa qiimaha lacageed ee qaansheegashada.
Inta aadan dacwad diiwaan gelin waxaa haboon laakiin aan waajib kugu aheyn in aad ku dadaasho in aad xalisaaan khalifaadka idiin dhaxeeya oo heshiis meel dhexe ah aad isugu timaadaan. Si aad taas u dhaqangeliso, waxa aad ku bilaabi kartaa adiga oo waraaq aad ka diiwaangelisay (si aad u xaqiijiso inuu helay) aad u dirto adiga oo boostada weydiisanaya in laguu keeno saxiixa qofka ay ku socoto marka uu warqadda helo. Warqaddaadu waxaa y noqon kartaa mid faahfahsan ama kooban. Ugu yaraan, waa in uu qoralkaaga soo koobo waxyaabaha aasaaska u ah qaansheegashadaada isla markaana aad ku caddeysaa qiimaha lacageed ee aad weydiisaneyso in lagu siiyo. Marka warqadaada uu akhriyo, waxaa suurto gal in qamaysanuhu ku siiyo lacagtaada ama uu kuu soo jeediyo heshiis aad meel dhexe isugu timaadaan.

Haddii aad go'aansato in aad dacwadda aad ka diiwangeliso maxkamadda dhageysata dacwadaha qaansheegashada, la xiriir maxkamada degaanka aad ku nooshahay ee dhageysata dacwadaha qaansheegashada. Weydii saacadaha ay maxkamadu shaqeyso, lacaga lagaa doonayo in aad bixiso si aad dacwadda u diiwaangeliso iyo haddii ay jiraan shuruuddo kale oo lagaa doonay in aad ka soo baxdo si aad u diiwaangeliso dacwadda. Xusuusnoow in shaqaalaha maxkamaddu aaney ku siin karin wax talo ah iyo qiimeyn ku sameyn qaansheegashada aad ka diiwan gelineyso maxkamadda. Laakiin waxaa suurto gal ah in ay faahfaahin kaa siin karaan waxyaabaha lagaa doonayo in aad maxkamadda hor keento si aad dacwaddaada ugu guuleysato. Haddii aan dacwaddaada laga diiwaangelin karin maxkamaddaas, weydii cinwaanka, magaca iyo telefoonada maxkamadda aad ka diiwaangelin karto dacwadda. Marka aad tagto maxkamadda si aad uga diiwaangeliso dacwadda, waxa lagaa doonayaa in aad maxkamadda u soo gudbiso ugu yaraan macluumaadkan:

**1**. Magaca sadexan ee qofka aad dacwada ku soo oogeyso (ama magaca goobta ganacsiga, haddii ay sidaa tahay), cinwaanka iyo telefoonka laga helo dacweysanaha;
**2**. Shax muujineysa ay ku cad yihiin wixii caddeymo ah ee taageero u noqonaya dacwadaada. Maxkamadaha qaarkood waxaa suurto gal ah in ay ku weydiiyaan in caddeymaha aad haysato aad u soo gudbiso maxkamadda marka aad dacwada diiwan gelineyso qaarkoodna maku waydiisanayaan in aad sidaa yeesho – weydii maxkamadda ka hor inta adan diiwaan gelin dacwadda. Nuqul ka reebo wax kasta oo aad maxkamadda ka diiwan geliso;
**3**. Magacyada iyo cinwaanada dadka markhaatiyaasha kuu ah iyo
**4**.Lacag kugu filan oo aad kharashka diiwaangelinta dacwada.
Waxaa suurto gal in ay maxkamaddu ku weydiiso macluumaad dheeraad ah ama waxyaabo kale – fadlan sii weydii inta aadan dacwadda ka diiwaan gelin maxkamadda.
Maxkamadaha intooda badan waxa ay ku siinayaan foom la buuxinayo oo aad ku soo buuxiso dacwadda qaansheegashada. Fadlan ku qor si bayaan ah oo la akhrin karo lana garan karo,



Somali (Translated November 2009)
Provided by the Interpreter Services Program of the Supreme Court of Ohio
The English version of this form and other information is available on the
http://www.supremecourt.ohio.gov/JCS/interpreterSvcs/forms

caddee sida wax u dheceen, xaaladaha ku saabsan dacwadaada iyo lacagta qansheegashada ah ee aad weydiisaneyso si kooban laakiin la fahmi karo. Fiiro gaar ah fiiri meelaha soo socda ee hoos ku xusan.

Marka aad muujineyso **qiimaha lacagta ee qaansheegshada** tixgeli inaad weydiisaneyso in dulsaar lagaa siiyo lacagta iyo in aad weydiisaneyo in qaameysanuhu bixiyo lacagta maxkamadda. Haddii aad sidaas dooneyso, hubi inaad ku muujiso qaansheegashada in dulsaar lagaa siiyo isla markaana magdhaw lagaa siiyo kharashka kale ee aad gashay sida lacagta aad ku bixisey maxkamadda iyo kharashka kaaga baxay dhaqangelinta (lacag aad siisey koox sadexaad ) Xusuusnoow in sharciga Ohio uusan ogoleyn in magdhaw laga siiyo mushahar kaa baaqdey waqtigii aad diyaarineysay ama aad maxkamadda ka diiwaan gelineysay dacwadda.
Isku day in aad ogaato in qaamaysanuhu ka tirsan yahay **xilligan la joogo ciidamada gaashaandhigga:** sharcigga dawladda dhexe ayaa difaacaya dadka ka hawlgala ciidamada gaashaandhigga maxkamadunna waxa ay ku weydiineysaa xaaladda askarnimo ee qaameysanaha (haddii uu xilligan shaqeynayo iyo haddii uu ka tirsan yahay laakiin uusan ka hawgelin xilligan). Maxkamaddu waa in ay si rasmi ah u gaarsiisaa qaameysanaha in dacwad lagu soo oogey sidaa darteed **adiga aya xil kaa saaran yahay inaad soo ogaato cinwaanka qaameysanaha lagala xiriiri karo** ogeysiiska rasmiga ah ee maxkamadda ka socda wa in loo gudbiyaa – “la gaarsiiyey” qaamaysanaha (qaameysanayaasha). Sida rasmiga ah ee loogu gudbiyo qaameysanaha dacwada waa iyada oo loogu diro lagan dhigo nooca boostada ee qofka laga keeno saxiiax ama caddeyn inuu helay qoraalkaas taas oo loogu diro goobta qofku ka shaqeeyo ama degan yahay. Waxaa boostada lagu soo celiyaa caddeyn muujineysa in gacanta laga saarey qof da’diisu ka weyn tahay 16 sano oo cinwaankaas degan. Hase yeeshee, haddii boostadu cadeyso in aan dacwadda loo gudbin qaamaysanaha, dacwaddu ma sii socon karto. Haddii ay tasi dhacdo, kala tasho shaqaalaha maxkamadda haddii dariiqooyinka kale oo suurto gal ah ee lagu heli karo adeeggan.

## Imisa ayaan bixinayaa?

Maxkamad kasta waxa ay leedahay kharash u go’an oo dacwadaha laga diiwaangeliyo. La xiriir maxkamadda oo weydii kharashka aad bixineyso si aad dacwad uga diiwangeliso. Haddii aad qorsheyneyso in maxkamaddu amarto in ay horyimaadana maxkamadda qaarka mid ah markhaatiyaashaada, weydii kharashka aad bixineyso.
Haddii aadan awood u laheyn in aad bixiso lacagta maxkamadda, waxa aad diiwaan gelin kartaa codsi maragkaca ah oo aad ku codsaneyso in lacagta lagaa daayo waxaana kaa caawinaya shaqaalaha maxkamadda sidii aad ku heli lahayd ama u buuxin lahayd foomka. Shaqaalaha maxkamadaadda ayaa ku siinaya cadeyn muujineysa in foomkaas lagaa qabtay. Haddii maxkamaddu ku qanacdo in aadan awoodi karin lacagta maxkamadda, waxaa suurto gal ah in lacagta lagaa daayo laakiin haddii aaney maxkamaddu ku qancin waxaa waajib kugu ah in aad jeebkaaga aad ka bixiso lacagta maxkamadda ee diiwaan gelinta dacwada.
Guud ahaan, waxa aad lacagtaas ka soo ceshan kartaa qaameysanaha adiga oo ku dari kara dacwada dulsaarka iyo kharashyada kale ee kaaga baxa diiwaangelinta dacwada.

## Intee in le’eg ayey qaadaneysaa?

Marka aad dacwad ka diiwaangeliso maxkamadda, maxkamada waxaa waajib ku ah inay qaabato taariikhda la dhageysanayo dacwadda taasoo inta badan u dhaxeysa 15 ilaa 40 cisha laga bilaabo taariikhda aad dacwadda ka diiwaangelisey maxkamadda. Waxaa laga yaabaa in waxyaabo kale



Somali (Translated November 2009)
Provided by the Interpreter Services Program of the Supreme Court of Ohio
The English version of this form and other information is available on the
http://www.supremecourt.ohio.gov/JCS/interpreterSvcs/forms

oo soo kordha ay dhageysiga dacwadda dib u dhigaan laakiin sida badan dacwadda waa in la dhageystaa 40 cisho gudahood.

## Dacwad ayaa la igu soo oogey! Maxaan yeelaa?

Haddii uu qof maxkamadda ka diiwaangelin dacwad qaansheegasho oo adiga lid kugu ah, waxa ay maxkamaddu kuu soo direysaa wargelin rasmi ah. Ogeysiiskaas iyo waxyaabaha ku lifaaqan ayaad ka helaysaa macluumaad muhim ah; magaca dacwoodaha, waxa ay dacwadu ku saleysan tahay, lacagtu inta ay le'eg tahay, cinwaanka maxkamadda dacwada laga diiwaangeliyey iyo taariikha iyo saacadda ay waajib kugu tahay in aad maxkamadda timado si aad xal uga gaarto dacwadda qaansheegashada ee liddiga kugu ah.

wargelintaasi waxa kale oo wehliya macluumaad la xiriira sida aad uga jawaabi lahayd sheegashada dacwoodaha. Dabcan, hadba sida aad uga jawaabeyso waxa ay ku xiran tahay sida aad u aragto dacwada lagugu soo oogey. Laakiin si kasta oo aad u aragto, hubi in aad si haboon u raacdo tilmaamaha ay maxkamaddu ku siisey si aad u diiwaangeliso jawaabta aad aaminsan tahay in ay tahay mid ku haboon. tilmaamaha lagu siiyey
.

**Maxkamadaha qaarkood waxa ay waajib ka dhigaan in aad jawaabta aad bixineysaa ay noqoto qoraal; qaarkoodna kama dhigan waajib. Haddii wargelinta laguu soo diro aaney caddeyn, la xiriir maxkamadda si aad u ogaato.** Xitaa haddii aaney maxkamaddu waajib ka dhigin in ay jawaabtaadu qoraal noqoto, inta badan waxaa caqligu ku jiraa in aad jawaabtaada qoraal ku soo koobto.

Haddii aad iyada oo qoraal ah soo gudbisey iyo haddii kalaba, **waxaa waajib kugu ah in aad timaaddo dhageysiga lagu dhagaysanayo dacwadda taariikhda iyo waqtiga lagu cadeeyey wargelinta maxkamadda.** Dabcan, haddii dacwada heshiis laga gaaro, dhageysiga dacwadda ee maxkamadda waa la baajinayaa. Tixraac "Maxaa la yeelaa haddii heshiis la gaaro ka hor inta aan dacwada la dhageysan?' ee bogga 12aad.

Halkan hoose waxaa ku xusan dhawrka siyaabood ee kuu furan in aad kaga jawaabi karto dacwad lagugu soo oogey. Tilmaamaha ay ku siiyeen shaqaalaha maxkamadda ee dacwada liddiga kugu ah laga diiwan geliyey waxa laga yaabaa in ay ku kala duwaanaadaaan siyaabaha aad uga jawaabi karto dacwada. **Haddii talo soo jeedinta hoose ay ka hor imaaneyso wargelinta rasmiga ah ee laguu soo diro, raac tilmaamaha ku lifaaqan wargelinta rasmiga ah.**

Iyada oo ku xiran hadba waxa aad ka rumeysan tahay dacwada lagugu soo oogey, waxa aad haysataa dhawr siyaaabood oo aad kala dooran karto.

**Haddii aad aaminsan tahay in dacwada lagugu soo oogey ay tahay mid sax ah,** waxaa laga yaabaa in aad bixiso lacagata lagugu sheegtay oo dhan taas oo soo gunaanaadeysa dacwada oo dhan. Tixraac "Maxaa la yeelaa haddii heshiis la gaaro ka hor inta aan dacwada la dhageysan?' ee ee bogga 12aad.

**Haddii aad aaminsan tahay in qeyb dacawada ka mid ah lagugu soo oogey ay tahay mid sax ah**, waxa aad qiraneysaa qeybta saxa ah isla makaana waad diideysaa dacwada inteeda kale

**Haddii aad aaminsan tahay in dacwada lagugu soo oogey ay dhamaanteen tahay mid aan run aheyn**, waad diidi kartaa iyada oo dhan.

**Haddii aad aaminsan tahay in dacwoodaha aad lacag ku leedahay**, waxa aad ugu jawaabi kartaa adiga oo dacwad liddi ku ah taa ka diiwaan geliya taas oo lagu magacaabo “dacwad liddi ku ah’

**Haddii uu dacwooduhu magacaabo qaamaysaneyaal badan oo kala duwan adiguna aad qaan ku leedahaya mid ka mid ah dacweysanayaasha** waxa aad diiwaan galin kartaa dacwad lid ku ah qaameysanehaas.

Taas oo lagu magaabo “qaan gudub ah”

**Haddii dacwada dacwoodaha ay ka maqan yihiin xubno muhiin ah si heshiis looga gaaro qaansheegashada**, waxa aad maxkamadda weydiisan kartaa in ay dadkaas maxkamadda yimaadaan adiga oo ka dhigaya “qaansheegashada qolada sadexaad”

Haddii aad doonto in ad diiwaan geliso dacwad liddi ku ah dacwada lagugu soo oogey, tan gudubka ee qaameysanayaasha kale aad u qabto ama kan kooxda sadexaad, weydii shaqaalaha maxkamadda sida loo diiwaan geliyo. Waxa jira waxyaabo dhawr ah oo la doonayo in la tixgeliyo:

**Qaansheegashadaada**: waa in aad faahfaahin ka bixisaa sababta aad u rumeysan tahay in aad dacwad furto oo aad diwaan geliso. Xusuusnoow, shaqaalaha maxkamaddu in aaney qiimeyneyn in dacwadaadu tahay mid wanaagsan oo qiil leh, laakiin waxa ay ku siin karaan foomamka iyo dariiqo loo maro si aad dacwadaada u diiwaam geliso

**Lacagta:** Haddii aad aaminsan tahay tahay in dacwoodaha ama mid ka mid ah dadka dacwada lagu soo oogey in aad lacag kugu leedahay, waa inaad weydiisataa waxa kaa maqan, in dulsaar lagaa siiyo, isla markaana laguu celiyo kharashka aad gashay si aad lacagtaas u hesho sida lacagta aad ku bixisey fulinta go’aanka maxkamadda ama qaansheegashada liddi ku ah ama qaansheegasho gudub ah.

**Kooxda sadexaad**: Haddii aad aaminsan tahay in koox sadexaad ama kooxda sadexaad ay tahay in ay maxkamadda yimaadaan isla markaana ay qeyb ka yihiin qaansheegashada maxkamadda loo soo gudbiyey – ama hadda ahaato in adiga dhinacaaga ka socdaan ama dhinaca kaa soo horjeedaa waxaa lagaa doonayaa in aad diiwaangeliso qaansheegashada kooxda sadexaad. Waa in aad xaqiijisaa in aad si buuxda u muujisaa magacooda oo dhan iyo cinwaankooda iyo kuwo lagu soo oogayo qaansheeagashada iyo sababta ay kooxaha uga qeyb qaadaneyso

**Taariikhaha la qabsado (deadlines)**: dacwadda lidiga ku ah iyo dacwada gudubka ah ee lagu soo oogo qaameysanayaasha kale waa in maxkamadda laga diiwan geliyaa 7 cisho ka hor maalinta loo qabtey dhageysiga qaansheegashada dacwoodaha weydii maxkamadda taariikhaha loo qabtey kooxda sadexaad.

**Wargelinta Rasmiga ah**: dhamaan kooxaha ka dhanka ah dacwada waa in si rasmi ah loo wargeliyaa dacwadaha —qaansheegashada liddiga ah oo dhan waa in “la gaarsiiyaa”. Hubi in aad weydiiso shaqaalaha maxkamadda sida qaaansheegashada gudubka ah, tan liddiga ku ah dacwada ama tan loo qabo qeyb sadexaad loogu gudbinayao dhamaan xubnahaas kale. Maxkamadda ayaa laga yaabaa in ay u gudbiso qeybaha kale ee horey loo soo sheegay ama **laga yaabo in ay kuu ogolaato in aad adigu u gudbiso (dacwoodaha) oo waajib ay kaaga dhigto maxkamaddu in a loo soo gudbiyo maxkamadda caddeyn muujineysa in dacwada qaansheegashada la gaarsiiyey** Tusaale ahaan, waxaa suurto gal ah in waajib lagaaga dhigo inaad ugu dirto kooxaha oo dhan ka dibna aad caddeyn in ay heleen ah aad maxkamadda u soo gudbiso).

Si kasta oo aad jawaab uga bixiso dacwadda lagugu soo oogey, hubi in aad sida ugu dhaqsaha badan ugu dhaqaaqdo. Haddii aaney tilmaamaha la socda wargelinta rasmiga ah aanay ku

xusneyn shuruudo gaar ah oo lagaa doonayo inaad fuliso, haddii aaney jawaabtaada la socon qaansheegasho dheeraad ah oo ka duwan tan kor lagu xusay, maalinta ugu dambeysa ee maxkamadda laga diiwaan gelin karo waa maalinta shaqada ugu dambeysa ee ka horeysa maalinta loo qabtey dhageysiga maxkamadda ee lagu xusay wargelinta rasmiga ah ee horey laguugu soo gudbiyey.

Taas waxaa loola jeedaa haddii, tusaale ahaan, dhageysiga maxkamadda loo qabtey maalin Isniin ah oo 6da Agoosto, jawaabta dacwada kooxaha kale khuseeysa waxa aad maxkamadda ka diiwan gelin kartaa ugu dambeyn bisha maalinta Jimcaha ah ee 3da Agoosto. Haddii ay jiraan wax dhibaatooyin ah oo kula soo gudboonaada si aad jawaabtaada gu soo gudbiso waqtigii ku haboonaa, hubi in aad wargheliso oo gaarsiiso maxkamadda.

Ugu dambeyn, xusuusnoow arrin kale oo la xiriirta nidaamka: wixii qoraal ah ee aad soo gudbiso ee ku saabsan dacwda waa in si cad looga arki karaa lambarka gal dacwadeedka kaas oo aad ka heli karto wargelinta rasmiga ah ee maxkamaddu kuu soo dirtey. Haddii jawaabtaada aanu lambar gal dacwadeedka la socon xoghaynta dacwadu ma diiwaangelin karto jawaabtaada taas oo dib u dhigi karta in qaaligu ogaado halka aad dacwadda ka taagan tahay.

**Habka maxkamaduhu u shaqeeyaan waa kala duwanaan karaa. Sidaa darteed waa in aad hubisaa in aad akhrisay oo raacdey tilmaamaha maxkamadda ee la socda wargelinta rasmiga ah. Haddii aad qabto wax su'aal ah oo la xiriira nidaamka iyo taariikhadaha la qabsadey ee ay ku eg yihiin diiwan gelinta dacwadda , la xiriir maxkamadda oo weydii.**

## Waa maxay dhexdhexaadinta?

Run ahaantii degmooyinka waaweyn oo dhan, iyo qaar ka mid ah degmooyinka yaryar sidoo kale waxa laga heli karaa dhexdhexaadiye si uu idinkaga caawiyo adiga iyo dhinaca kale ee aad iska soo horjeedaan in aad ka wada shaqeysaan heshiis la gaaro. Dhexdhexaadiyuhu ma aha qaali, go'aana kama gaarayo dacwadiina idinmana siinayo talo xaga sharciga ah.

Dhageysiga dhexdhexaadintu waa shir ay maxkamaddu kor kala socoto taasoo dacwoodaha iyo qaameysanaha lagu siiyo fursad ay isgu hor yimaadaan fool ka fool isla markaana wada falanqeeyaan farqiga u dhaxeeya iyo waxa ay isku hayaan. Waxyaabaha lagu ogaado falanqeyntaas laguma adeegsan karo maxkamadda.

Ka faa'iideyso sida ugu haboon fursadaas kana qeyb qaado dhageysiga dhexdhexaadinta!

Dhageysiga maxkamadaha waa mid aan rasmi ahayn waxaana laga wada hadli karaa si balaaran arrinta la isku hayo oo dhan ee la xiriirta qansheegashada: waxa ay noqon kartaa oo kaliya fursadda lagu soo bandhigo waxa aad qabto oo dhan, dhageysato waxa ay qolada kaa soo horjeedda ku doodeyso isla markaana lagu gaari karo heshiis ku saabsan arrimaha oo dhan marka laga reebo lacagaha la isku heysto. Adiga oo u sii maraya dhexdhexaadinta, waxa aad gaari kartaa heshiis ka wanaagsan oo baahidaada kaga haboon amar maxkamadeed oo qaali uu dusha kaa saaro go'aan.

Dhexdhexaadintu dhawr marxaladood ayey suurto gal tahay ka hor inta aadan dacwadda ka diiwaangelin maxkamadda taasoo ay suurto gal tahay in aad codsan karto in laguu balamiyo dhageysi dhexdhexaaadin xitaa maalinta maxkamadda ay qabatay in la dhageysto dacwadaada. Maxkamadaha qaarkood ayaa waajib ka dhiga dhageysiga dhexdhexaadinta. La xiriir maxkamadda degaankaaga oo weydii haddii aadan hubin.

## Maxaan yeelayaa haddii la gaaro heshiis ka hor inta aan dacwadda la dhageysan?

**Haddii aad diiwaan gelisey dacwad qaansheegasho ah**, isla markaana uu qameysanuhu bixiyo wixii aad ku heshiiseen si heshiiis looga gaaro dacwadda, waa in aad maxkamadda si qoraal ah

ku soo wargelisaa. Waa in aad maxkamadda weydisaa in lagaaga baahan yahay in aad buuxiso foom u gaar ah ama aad u qorto maxkamadda qoraal wargelinaya in heshiis la gaarey. Qoraalka aad maxkamadda u soo qorto ee muujinaya in heshiis la gaarey waxa uu galaya diiwaanka dacwadda waxaana halkaas lagu baajinayaa oo lagu xirayaa dacwadda. Xusuusnoow maxkamaddu ma soo celineyso wixii lacag ah ee horey loogu bixiyey diiwaangelinta dacwadan. Heshiis kasta oo la gaaraa waa in maanka lagu hayaa lacagtaas.

**Haddii dacwad lagugu soo oogey,** isla markaana aad heshiis la gaartey qofkii dacwada kugu soo oogey kaas oo aad rumeysan tahay in dacwada oo dhan heshiis laga gaarey, weydiiso dacwoodaha qoraal heshiiskaas xaqiijinaya isla markaana nuqul qoraalkaas ka mid ah waa in maxkamadda laga diiwaangeliyaa. Haddii aadan maxkamadda ka helin wargelin ay ku caddahay in la baajiyey dacwaddii maxkamadda laga diiwaan geliyey isla markaana loo qabtay taariikh lagu dhageysto, la soo xiriir maxkamadda si aad u xaqiijiso in run ahantii ay dacwadaasi dhamaatey oo la baajiyey.

## Sidee ayaan u diyaarinayaa dacwadda?

Haddii aad tahay dacwoodaha ama qaameysanaha, hawshaadu waa in aad qaaliga u soo bandhigtaa xaqiiqada dhabta ee isla markaana aad ku qancisaa inuu go'aanka adiga dan kuugu jirto. Dhageysiga dacwadda ka hor, soo ururi wixii caddeymo ah, la xiriir markhaatiyaashaada, isla markaana si qoraal ah oo sawiran u diyaari dhinacaaga.

**Caddeymahaaaga** waxa ka mid noqon kara:

√ markhaatiga aad maxkamadda ka hor furto (aad ka hadasho),

√ Marag kaca markhaatiyaashaada,

√ Qoraalo aad hor keento maxkamadda sida lacag qabshada, heshiis aad horey u saxiixdey, heshiis shaqo, damaanad qaad deyn, IOUs, wareegto horey loo qorey, warqado, warqado ay boostadu soo celisey, iyo qaansheegasho horey loo direy oo aan laga qaadan boostada

√ Waxyaabaha la xiriira dacwadda — tusaale ahaan waxa aad maxkamadda u soo bandhigi kartaa alaab haleysan taas oo difacaaga ku saleysan

√ Sawiro iyo jaantusyo, kuwaas oo si gaar ah u muujinaya dhaawaca gaarey waxyaabaha qaarkood ama sawirka goob shil ka dhacay. .

Si kooban, wax kasta oo faa'iido u leh dacwadaada ayaad daliil u adeegsan kartaa. .

Hase yeeshee, **ka hubi maxkamadda waxyaabaha aad daliil u adeegsan karto.** Maxkamadaha qaarkood ma ogolaadaan maragkac qoraal ah – qoraal uu soo gudbiyey qof la socda xaqiiqda dacwada – laakiin waxa ay waajib ka dhigaan in markhaatiyaashu ay maxkamadda hor yimaadaan. Maxkamadaha qaarkood waxa ay wajib ka dhigaan in aad dhawr nuqul ka soo sameyso waxyaabaha aad maxkamadda u soo gudbineyso sida qoraalada, sawirada, iwm. Adiga ayaa xil kaa saaran yahay in aad hubiso in daliilka aad dooneyso in aad maxkamadda horkeento si ad ugu soo bandhigto dacwadda ay maxkamaddu ogoshahay iyo in kale.

Waxaa dhici karta in markhaatiyaasha qaarkood ay si gaar ah dacwada faa'iido badan ugu leeyihiin. Tusaale ahaan, marka ay dacwaddu ku saabsan tahay shaqo dhinaca dhismaha ah oo aan si hagaagsan loo qaban waxaa markhaati kuu noqon kara qof ku wanaagsan dhismayaasha oo ka marag kici kara waxyaabaha aasaaska u ah dhismayaasha. Markhaatiyaasha kale ee dacwadan waxaa ka mid noqon kara saaxiibadaa, deriskaaga ama dad goobta marayey oo laga yaabo in ay arkeen markii dhibaatada dhismaha ka dhalatay ay dhaceysay.

Waxaa haboon isla markaana aad muhim u ah in aad **la hadasho markhaatiyaashaa dacwada** ka hor inta aanu bilaaban dhageysiga dacwada. Waa in aad kala sheekeysataa waxa ay ogyihiin iyo haddii ay doonayaan in ay maxkamadda yimaadaan oo ay ka markhaati furaan. Marka aad la

hadasho markhaatiyaasha u sheeg in ay runta sheegaan. Xusuusnoow in markhaatiyaashaada su'aalo ay weydiin doonaan dhinaca kale ee kaa soo horjeeda. Wax yar dhageysiga ka hor, mar kale la xiriir markhaatiyaashaada oo hubi in ay ogol yihiin in ay yimaadaan oo ay ka markhaati furaan maxkamadda isla markaana u xaqiiji waqtiga iyo goobta lagu qabanayo dhageysiga dacwada.

Haddii qof ka mid ah markhaatiyaasha aanu dooneyn inuu yimaado maxkamadda oo uu ka markhaati furo isaga sidaas doortey oo aan la khasbin, waxa aaad maxkamadda weydiisan kartaa in ay soo saarto amar qofkaas ku amraya inuu yimaado oo maxkamadda ka markhaati furo. (arrintaas sii diyaari ka hor inta aan la gaari dhageysiga dacwada!), adeegyada (sida qofka loogu diri lahaa amarka maxkamadda ee ah inuu yimaado oo markhaati furo). Amarka noocaas ah waxaa la yiraahdaa Maxkamad uga yeeris (subpoena), iyo kharashka dheeraadka ah ee laga doonayo si markaas loo gaarsiiyo markhaatiga.

**Caddeymo intee le'eg ayaa igu filan?** Ma jirto jawaab fudud oo su'aashaas lagaga jawabi karo.—dacwooyinka qaarkood markhaati furkaaga oo kaliya ayaa kugu filan, laakin waxa ay u badan tahay in aad u baahaneyso markhaatiyaal iyo cadeeymo kale. Sida ugu haboon ee lagu ogaado inta caddeymo aad dooneyso waa adiga oo naftaada ka soo qaada in aad tahay qaaliga dacwada dhageysanaya isla markaana aadan garaneyn xaqiiqada dacwadan isla markaana aad is weydiiso "caddeymo intee le'eg ayaan u doonayaan in aan helo si aan go'aan uga gaaro dacwadan oo lo xukumo si aan ugu guuleysto dacwadan?"

Waxaa taa ka sii muhiimsan **tayada** daliilaha aad soo bandhigto. Markhaatiyaashaadu waa in ay yihiin kuwo la rumeysan karo markhaatigooda—waa in ay noqdaan dad aqoon toos ah u leh xaqiiqada ay soo bandhigayaan iyo waxyaabaha ay ka marag kacayaan isla markaana runta sheegaya. Waxyaabaha kale sida warqadaha lacag qabashada, heshiisyada, qoraalada, iyo waxyaabaha ee aad ku soo bandhigeyso maxkamadda waa in ay cad yihiin lana fahmi karo oo la akhrin karo isla markaana ay yihiin wax shakiga ka fog. Xusuusnoow, in dhinaca kale uu isna uu soo bandhigayo markhaatiyaal iyo caddeymo ka hor imanaya kuwo aad soo bandhigtey. Waxaa lagaa doonayaa in aad hubiso in ay dacwadaadu la socdaan caddeymo xoog badan iyo markhaatiyaal sax ah.

Marka aad soo ururiso cadeymaha la xiriira dacwadaada, oo ay ka mid yihiin markhaatiyaasha aad soo bandhigeyso, diyaarso **shax kooban** oo ay ku urursan yihiin meelaha aad dooneyso in aad xoogga saarto oo difaaca u noqon kara dacwaddda.

Shax ka samee cadeymaha iyo markhaatiyaasha sidii aad u kala hormarin laheyd. Si wanaagsan oo loo soo bandhigo dhinacaaga sida aad dacwadda u aragto waa adiga oo u kala hormariya dhacdooyinku sida s ay u kala horeeyeen sidii adiga oo ka sheekeynaya oo kale. Marka aad sidaa yeesho oo kala saarto markhaatiyaasha iyo caddeymaha kale ee aad soo bandhigeyso waa ay is dhameystirayaan, oo ay fududeyneysaa in la fahmi karo sida ay dhacdooyinku isugu xigaan

## Maxaa dhacaya haddii aanan imaan dhageysiga dacwadda?

Haddii aadan imaan dhageysiga dacwadda waxaa markiiba loo xukmayaa dacwada dhinaca kale waana lagaaga guuleysanayaa iyada oo aan wax tixgelin ah aan la siin difaaca iyo caddeymaha aad heysato.

Haddii labada dhinac mid ah ka maqnaado dhageysiga dacwadda isla markaana aanu qaaliga wargelin sabab suurto gal ah oo uu kaga maqnaadey dhageysiga dacwadda, qaaligu waxa uu dacwadda u xukumayaa oo cadeynayaa in ay ku guuleystey dacwada dhinaca ka soo qeyb galay

dhageysiga dacwadda.  Haddii aadan ka soo qeby gali karin dhageysiga dacwada la soo xiriir maxkamadda marka ugu horeysa ee aad ogaato in aadan ka soo qeyb geli karin dhageysiga dacwadda una soo gudbi codsi dib loogu dhigayo dhageysiga dacwadda adiga oo ugu soo gubinaya hab qoraal ah ama faakis. maxkamadaha badankood waxa ay waajib ka dhigaan in aad soo gudbiso qoraal aad ku codsaneyso in dib loo dhigo dhageysiga dacwadda. Waxaa suurto gal ah in dhageysiga maxkamadda loo qaato maalin kale.
Haddii aad ogaato wax yar ka hor waqtigii loo qabtey dhageysiga dacwadda in aadan ka qeyb qaadan karin dhageysiga dacwadda ama aad ka soo daaheyso dhageysiga dacwada, la soo xiriir maxkamadda oo u faahfaahi xaaladda kula soo deristey.

### Maxaa la iga doonayaa in aan sameeyo dhageysiga maxkamadda?

Maalinta aad maxkamadda ku leedahay waa maalinta dacwada la dhageysanayo—fursadda aad heysato in aad ku soo bandhigto qaansheegashadaada, difaaca dacwadda lagugu soo oogey, dacwadda gudubka ah, ama dacwada loo haysto koox sadexaad. Hadii aad guuleysato iyo haddii lagaa guuleystaba, waxaa laguu balanqaadayaa dageysi maxkamadeed oo caddaalad ku dhisan. Adiga iyo dhinaca kale ee kaa soo horjeeda waxa aad fursad u yeelaneysaan in aad soo bandhigtaan dacwadda aad qabto iyo difaaca aad isaga difaaceyso ama naftaada ku difaaceyso. Maxkamadda hor keen waxyaabaha difaaca kuu ah iyo markhaatiyaasha dacwada. La imoow maxkamadda dhawr nuqul oo ka mid ah waxyaabaha difaaca kuu ah. sida qoraalada, sawirada, iwm. Xaqiiji in maarkhaatiyaashaadu ay iyagana maxkamadda yimaadaan —maxkamadaha intooda badan ma ogolaadaan maragakaca la soo qoro ee dadka markhaatiyaasha ah soo gudbiyaan ama in telefoon lagula hadlo ay ku marag furana. (waxaa taas ka duwanaan kara marka qiimeynayo kharashka magadhawga ah; haddii ay dacwadaada arrin noocaas oo kale ku jirto weydii maxkamadda haddii ay ogolaaneyso in qiimeyn qoraal ah aad maxkamadda u soo gudbin karto. Ay maxkamaddu u aqoonsaneyso daliil ahaan)

Dacwadaada waxaa laga yaabaa in ay ka mid noqoto mid ka mid ah dacwooyinka dib loo dhigo oo la dhageysto wax ka badan mar qura. Sug inta la soo gaarayo  doorkaaga, kana jawaab marka la soo gaaro doorkaaga.
Dacwoodaha ayaa marka hore hadalka qaata. Qaaliga ayaa weydiista inuu soo bandhigo dacwoodaha dhiniciisa iyo aragtida uu qabo. Marka uu dacwoodaha hadalkiisa dhameysto, waxa uu qaaaligu weydiiyaa qaameysanuhu inuu ka jawaabo eedaha loo soo jeediyey.
Soo koob hadalkaaga isla markaana ku taagnoow xaqiiqada. Adeegso soo gaabintii aad horey u qortey markii aad isu diyaarineysay dacwadda. Xoogga saar meelaha adiga aad garta ku leedahay isla markaana sharax oo faahfaahi meelaha lagugu xadgudbey. Qaaliga ayaa laga yaabaa inuu su'aalo ku weydiiyo. Uga jawaab su'aalaha qaaliga si toos, edeb ka muuqato iyo sida ugu wanaagsan ee aad wax uga ogtahay.
Dhaqan wanaagsan muuji— ma aha qaaliga oo kaliya in aad dhaqan wanaagsan u muujiso laakiin sidaa oo kale waa in aad u muujisaa markhaatiyaasha kaligaa kuma weydiinayo ee waxa uu sidoo kale weydiinayaa markahaatiyaasha oo dhan ee ka socda dhinaca kale. Wax kasta oo dhaca waa in aad xakameysaaa caradaada. Waa in aad muujisaa dhaqan wanagsan iyo deganaan isla markaana aad dacwada u soo bandhigtaa si cadaalad ahna ugana qeyb qaadataa dhageysiga dacwada si hufan oo wanaagsan.

Waxa ay u badan tahay in aad isku buuqdo. Is daji oo adiga oo aan isku buuqin dacwadaada si hufan u soo bandhig sida kuugu fudud. Qaaligu waa uu ogsoon yahay in aadan aheyn qareen



Somali (Translated November 2009)
Provided by the Interpreter Services Program of the Supreme Court of Ohio
The English version of this form and other information is available on the
http://www.supremecourt.ohio.gov/JCS/interpreterSvcs/forms

waana uu kuu dabacsanaanayaaa. Si feejigan u dhageyso waxa uu qaaligu soo jeediyo ama ku weydiiyo ugana jawaab hadba sida ku haboon.

Marka uu dhageysto labada dhinac, qaaligu (ama xeer yaqaanku) waxa uu gaarayaa ama gaareysaa go'aan. Qaaligu waxa auu go'aanka gaarayaa ugu dambeysta ama waxa laga yaabaa inuu yiraahdo "waan dhageystay ee ii soo gudbiya wixii caddeymo ah) isla markaana soo saaro go'aan qoraal ah. Xaqiiji in aad maxkamadda weydiiso sida lagugu soo gaarsiinayo go'aanka maxkamadda.

.

**Maxaan yeelayaa haddii aanan qaaliga ku raacsaneyn go'aanka uu gaarey?**

Haddii aadan ku raacsaneyn go'aanka qaaligu ka gaarey dacwaddaada, waxaa suurto gal ah in aad sii wadi karto dacwadda. Habka loo sii wado dacwada iyo tariikhaha la isu qabto way ku kala duwan yihiin maxkamaduhu .

Waxa aad qaaliga ama xeer yaqaanka dacwadaada dhageystay weydiisan kartaa inuu mar kale tixgeliyo dacwada. Weydii shaqaalaha maxkamadda sida loo diiwaangeliyo in mar kale dacwadaada dib loo eego.

Hadii sharci yaqaan uu qaali magacaabey dhageystay dacwada waxa aad maxkamadda ka diiwaangelin kartaa muddo 14 cisho gudahood ah qoraal diidmo ah oo aad ku muujineyso inaadan ku raacsaneyn go'aanka uu gaarey xeer yaqaanku. Diidmadaada waxaa dib u eegaya qaali ka socda maxkamadda isaga oo raaacaya nidaam u degsan maxkamadda. Qaaligu waxa uu ku raacayaa oo adkeyn karaa go'aankii uu soo saarey xeer yaqaanka oo soo saari kara amar taageeraya go'aanka hore ama waxa uu codsanayaa in mar kale dacwada dib loo dhageysto. Weydii shaqaalaha maxkamadda sida loo diiwaangeliyo qoraal aad ku diidan tahay go'aanka xeer yaqaanka.

Haddii dacwadda uu dhageystay qaali isla markaana go'aan ka gaarey, waxa aad racfaan uga qaadan kartaa maxkamadaha rafcaanka ee ay hoos timaado maxkamdda degaanka ee dhageysatay dacwada. Waa wax aan dhicin inta badana in rafcaan laga qaato maxkamdaha dhageysta dacwadaha qaansheegashada, laakiin rafcaanku waa mid suurto gal ah. weydii shaqaalaha maxkamadda sida aad rafcaan ugu diiwaangelin lahayd maxkamadda rafcaanka.

Haddii aad maanka ku heyso in aad diiwaangeliso diidmada go'aanka xeer yaqaanka ama aad rafcaan ka qaadaneyso go'aan uu qaali gaarey, waxa aad u baahan tahay in aad sadex waxyaabood aad maanka ku heyso:

**Lacagta diiwaangelinta**. Waxaa suurto gal ah in aad bixiso lacag dheeraad ah oo aad ku diiwaangeliso diidamda ama rafcaanka—xaaladaha qaarkood diidmada aad diido go'aanka xeer yaqaanka iyo ilaa maxkamadaha sare ee rafcaanka oo dacwada ay sii socon karto.

**Duubitaanka**. Sida badan dacwadaha dhageysta maxkamadaha qaansheegashada waa la duubaa — oo si maqal ah iyo siyaabo kale loo duubaa. Haddii aad diiwaan geliso diidmo ama rafcaan aad ka qaadato, waxaa wajib kugu noqoneysa in aad bixiso lacagta loogu bedelayo qoraal dhageysiga maxkamadda ee horey loo duubey

**Kharashka ku baxa iyo hawlaha la xiriira**. Habka rafcaan qaadashada waa mid aad u dheer isla markaana uu kharash badan ku baxo. Inta aadan bilaabin, la tasho qareen si aad u ogaato waxyaabaha aad xaqa u leedahay.

### Ka waran bixinta qaansheegashada

Haddii adiga laguu xukumey macnaheedu waa adiga in aad lacag ku leedahay dhinaca kale, sii akhri cutubka kan ku xiga si aad u ogaato waxyaabaha aad sameyn karto si aad u hesho lacagta laguu xukumey.

Haddii adiga lagaa xukumo macnaheedu waa in lagaa guuleystay dacwada oo aad lacagta lagugu xukumey aad siiso dhinaca kale ee loo xukumay. La xiriir oo isku day in aad kala gorgortanto qofka kale ama hay'adda dacwada kaaga guuleysatay sidii aad u siin lahayd lacagta loo xukumey isla markaana aad heshiis ula geli lahayd. Marka aad lacagtooda siiso, weydiiso in ay ku siiyaan caddeyn muujineysa in aad lacagtooda siisey iyada oo dhameystiran.

Haddii aadan wada bixin karin lacagta loo xukumey markiiba, waxa aad qaaliga weydiisan kartaa inuu ku ogolaado in aad si tartiib tartiib ah u bixiso  Haddi xaaladaada maaliyadeed ay aad u xun tahay, waxaa jira fursado dhawr ah oo aad leedahay taasoo lagu soo koobay cutubka "maxaan yeelayaa haddii aan doonayo in la iga gargaaro bixinta lacata la igu xukumay" ee bogga 20aad.

### Sidee ayaan ku helayaa lacagta la ii xukumay?

**Adiga ayaa bilaabaya talaabooyinka ugu horeeya ee aad ku dhaqangelineyso  go'aanka maxkamadda.** Maxkamaddu ma kuu soo ururineyso lacagta. Hase yeeshee, haddii aad qaaddo talaabooyinka lagaaga baahan yahay, oo ay ka mid tahay bixinta lacagta maxkamadda, maxkamaddu waxa ay kugu caawineysaa in aad dhaqangeliso go'aanka ay soo saartey (lacagtada aad hesho). Qeybtan waxa ay faahfaahin ka bixineysaa sidii aad ku heli lahayd lacagta laguu xukumey, iyadoo oo qaybaha ku xigana ay faahfaahin ka bixinayaan gargaarka aad ka heli karto maxkamadda.

Dariiqa ugu haboon ee lagu helo lacagta laguu xukumey waa iyada oo qameysanuhu uu iskii u bixiyo (qofka uu sharcigu ku wajibinayo inuu bixiyo lacagta). Haddii qofka lagu xukumo inuu lacagta bixiyo aanu iskii u bixin, maxkamaddu sadex hab ayey mid uun kugu caawin kartaa: waxa aad qeyb ka heli kartaa qofka dakhliga soo gala iyada oo mushaharka qaameysanaha lagaaga soo jaro ama dulsaarka uu ka helo xisaabta bankiga, adiga oo "xuquuq ku yeesha hantida ma guurtada ah ee uu leeyahay" ama adiga oo iibiya qaar ka mid ah hantida uu qofkaas leeyahay.

**Qofka oo iskiis u bixiya**. Haddii ay suurto gal tahay, kula heshii qaameysanaha inuu ku siiyo waxa laguu xukumay mar kaliya ama si tartiib tartiib ah. waxa ay maxkamaddu amri kartaa in taariikh go'an lacagta oo dhan lagu bixiyo ama si tartiib tartiib ah laguu siiyo.

**Mushahar ka goyn.** qaamaysanuhu iskii uma bixinayo lacagta. Mid ka mid hababka lagu fuliyo go'aanka maxkamadda waa iyada oo qofka mushaharkiisa si toos looga soo jaro lacagta, waxa ay maxkamaddu amar ku bixineysaa in goobta uu ka shaqeeyo qaameysanaha ama bankiga ay lacagta u taal uu qeyb ka mid ah siiyo deyn bixiyaha (qofka loo xukumey lacagta in la siiyo oo dacwada ku guuleystay) lacagta soo gasha qaameysanaha.

Waa mid go'an lacagta ay goobta shaqadu ka goyn karto mushaharka qaameysanaha. Bankiyaduna waxa ay bixin karaan oo kaliya lacagta qameysanaha ugu jirta xisaabta bankiga. Waxaa jirta in ay tahay lacag go'an inta uu goobta qofku ka shaqeeyo ama bangigu u soo gudbin karo maxkamadda. Ugu horeyn, lacagta ay bixinayaan kama badnaan karto lacagta ay maxkamaddu xukuntay. Midda labaad, bangigu waxaa uu bixin karaa oo kaliya lacagta ku jirta



Somali (Translated November 2009)
Provided by the Interpreter Services Program of the Supreme Court of Ohio
The English version of this form and other information is available on the
http://www.supremecourt.ohio.gov/JCS/interpreterSvcs/forms

xisaabta qaameysanaha ee bankiga. Tan sadexaad, haddii lacagta xisaabta ku jirta ay si toos uga timid mushaharka uu qameysanuhu qaato, lacagta bulshada ee dawladdu bixiso ama noocyada kale ee lacagaha hawlgabka, lacagtaas laguma bixin karo xukunka maxkamadda ee qaansheegashada loo xukumay dayn bixiyaha. Tan afraad, guud ahaan, qof shaqaalaha kama jaro qaameysanaha wax ka badan 25% mushaharka guud ee uu qaato.
Waxaa suurto gal ah in ay jiraan amar maxkamadeed oo qaamaysanaha aad weydiisaneyso in mushaharka lagaaga jaro horey loogu xukumey inuu qaan lagu lahaa bixiyo. Haddii ay taasi jirto, mushaharka laga jaro qofka waxaa loo dhaqangeliyaa sida go’aanka maxkamaddu hadba ugu soo kala horeeyey loo shaqeelyaha lacagta ka jaraya qaaameysanaha. Marka la dhiiwaangeliyo mushaharka qofka toos looga jarayo waxa uu dhaqan gal noqonayaa ugu yaraan lix (6) bilood ama ilaa lacagta laga bixiyo, hadba kii soo horeeya. Sidaa darteed, waxaa laga yaabaa “in aad sugto inta laga soo gaarayo doorkaaga” tan iyo inta laga dhaqan geliyo xukunka maxkamadda ee amraya in mushahar laga jaro qaameysanaha.
**Qeyb ku Yeelsahada Hantida.** Waxaa kale oo aad qeyb ku yeelan kartaa hantida ma guurtada ah ee qameysanaha . Qeybta aad ku yeeleneyso hantida ma aha darriqo aad markiiba lacag ku heleyso laakiin waxa ay ku siineysaa dariiqo sugan oo aad ku ilaalin marto sida danta kuugu jirto - rahmad oo kale – oo aad ku yeelato hantida qaameysanaha Tixraac “Sidee ayaan qeyb ugu yeelan karaa hantida qofka? Maxaase loola jeedaa? Ee bogga 21.
**Lifaaq**. Hab kale oo aad ku dhaqangelin karto xukunka maxkamadda waa lifaaq. Habkan lifaaqa, waxa ay maxkamaddu amreysaa in qeyb ka mid ah hantida ma guurtada ah ee qaameysanaha (sida gaari la ogyahay inta uu u qalmo lacag ahaan, telefishanka waaweyn ee guryaha la dhigto, waxyaaba taariikh leh oo qofkaas uu horey un keydsaday ama wqaxyaabo kale) laga qaado oo la iibiyo si loo bxiiyo deynta lagu leeyahay. Habkan lifaaqa ah waa mid aad u adag isla markaana waqti ka badan kan uu qaato mushaharka qofka laga gooyo isla markaana uu kharash badan ku baxo. Haddii aad tixgelineyso in aad habkaan doorato, waxaa haboon in aad qareen la tashaato. Si aad u bilowwdo habka mushaharka laga gooynayo qaameysanaha, lifaaqa iyo qeyb ku yeelashada hantida qaameysanaha waxa aad u baahan tahay gargaarka maxkamadda.

## Sidee ayaan ku heli karaa gargaar ku saabsan dhaqangelinta go’aanka maxkamadda?

Waxaad aad gargaar ku heli kartaa adiga oo la soo xiriira maxkamadda soo saartey go’aanka ama la xiriira qareenkaaga. Haddii go’aanka ay gaartey maxkamadaha dhageysta dacwadaha qaansheegashada, maxkamadda ayaa ka agargaareysa dhaqan gelinta go’aanka—laakiin oo kaliya *ka dib* marka aad bixiso kharashka maxkamadda . Hase yeeshee, inkastoo ay tahay in aad laxagta marka hore aad bixiso, haddii aad weydiisatay in ku caddeysay dacwadaada lacaga kaaga baxday dacwada (ama dacwadda liddiga ku ah tan lagugu soo sheegtay ama kooxda sadexaad) waxaa suurto gal ah in laguu celiyo lacagtaas haddii aad ku guleysato dhageysiga dacwada ee maxkamadda.

Ka dib marka aad bixiso kharashka maxkamadda , shaqaalaha maxkamadda ayaa kuu faahfaahinaya nidaamka ay maxkamaddu u shaqeyneyso isla markaana ku siinaya foomamka la doonayo in aad buuxiso si ay u fuliso mushaharka laga gooynayo qaameysanaha, lifaaqa iyo qeyb ku yeelashada hantida qaameysanaha. Haddii ay lama huraan noqoto talaabo ay maxkamaddu qaaddo si si fuliyo xukunka maxkamadda, waa in aad la timaadaa dulqaad iyo adkeysi. Sharcigu waxa uu qaameysanaha u ogol yahay in aan laga qaadi karin waxyaabaha

qaarkood (qaar ka mid ah hantidooda) si ay u noolaadaan. Deyn bixiyayaashu kama qaadi akraan qaameysanaha waxyaabahaas sharcigu u ogol yahay.

### Sidee ayaan ku ogaan karaa hantida qaameysanaha si la iigu xaraasho ama aan xuquuq ugu yeesho?

Sida ugu haboon ee loo ogaan karo hantida qaameysnaha waa iyada oo maxkamaddu ay ku amarto inuu kajawaabo su'aalo la xiriira hantidiisa iyo guud ahaan maaliyadda ee uu leeyahay. Sug muddo 30 cisho ah ka dib marka aad kaga guuleysato dacwadda aad dhageysatay. Haddii ay dhacdo in mudadaas gudaheeda aan la fulin amarkii maxkamadda isla markaana aan la gaarin wax hehshiis ah oo lacagta lagu bixinayo, waa in aad dib ugu noqotaa maxkamadda soo saartey amarka oo aad ka codsataa in ay soo saarto amar maxkamadeed oo qaameysanaha lagu amrayo in uu ka jawaabo "xogwareysiga qaameysanaha". Xogwareysiga qaameysanaha, waxa ay maxkamaddu ku amreysaaa qaameysanaha in uu caddeeyo hantida uu leeyahay, dakhliga soo gala iyo deynta lagu leeyahay.

Maxkamadaha qaarkood inta aaney amarka soo saarin waxa ay ku bilaabaan iyagoo oo deyn bixiyaha uu u diro qaameysanaha warqad uu ku weydiisanayo in qaameysanuhu lacagta lagu xukumey ku bixiyo muddo 15 cisho gudahood ah . Maxkamadda ayaa laga heli karaa foomamka codsigaas lagu sameynayo.

Maxkamadaha qaarkood waxa ay qabtaan dhageysi ku saabsan xogwareysiga maaliyadeed ee qaameysanaha. Haddii qaameysanuhu ka soo qeyb geli waayo dhageysiga maxkamadda, kaas oo aad ka qeyb geli karto (deyn bixiyaha) laakiin dadka qaarkood ayaa doorbidaya in ay qaameysanaha u diraan foomka lagu xog wareysanayo. Haddii qaameysanuhu ka soo qeyb geli waayo dhageysiga maxkamadda ama uu maxkamadda u soo gudbin waayo macluumaadka la weydiistey waxaa lagu soo oogi karaa inuu qaameysanuhu hor istaagey ama ay hor istaagtey hawlaha maxkamadda waxaanu suuro gal ah in la ganaaxo ama xabsiga la dhigo ama labadaba. Xog wareysiga maaliyadeed ee qaameysanaha waxa uu ku siinayaa macluumaadka aad u baahan tahay si aad u dhaqangeliso go'aankii maxkamadda ee ay kuu xukuntey. Tusaale ahaan, macluumaadku waxa lagu ogaanayaa shaqada qaameysanaha, xagee ayuu ku leeyahay xisaabaadka bangiga iyo haaddii qamaysanuhu leeyahay hanti ma guurto ah. iwm.

### Sidee ayaan qeyb ugu yeelan karaa hantida qofka? Maxaase loola jeedaa?

Dhaqan gelinta go'aanka maxkamadda waxa aad ku heli kartaa adiga oo "caddeynta go'aanka maxkamadda" ka diiwaan geliya maxkamadda adiga oo u soo gudbinaya xoghaynta maxkamadda ku taal deegaanka qaameysanuhu ku leeyahay hanti ma guurto ah

**1**. ka soo qaado nuqul ka mid ah go'aanka maxkamaddu kuugu xukuntay in aad ku guuleysatay dacwadda maxkamadda dhageysatay dacwadaada. Waxa aad bixineysaa xoogaa lacag ah oo lagaa qaado si laguugu diyaariyo go'aanka maxkamadda.

**2**. Iyada la adeegsanayo macluumaadka laga helay qaameysanaha (tixraac qeybtii hore) waa inaad ogaataa goobta uu qaameysanuhu ku leeyahay hanti ma guurto ah. Waxaa suurto gal ah in macluumaadkaas laga heli karo diiwaanhayaha hantida ma guurtada ah ee degamada dhulku ku yaal.

**3**. la xiriir xoghanta maxkamadda degaanka ee qaameysanuhu ku leeyahay hanti ma guurto ah kana xog wareyso sida ay suurto gal u tahay in ay diiwaan geliso dacwad laga diiwaangeliyo

maxkamadda degaanka.  Waxaa suurto gal ah in lacag laaga qaado si laguugu diyaariyo qoraal caddeynaya go'aanka maxkamadda.

**4**. Haddii uu qaameysanuhu hanti ku leeyahay wax ka badna hal degmo, waxa aad go'aanka maxkamadda ka diiwaan gelin kartaa dhamaan degmooyinka uu hantida ku leeyahay. Haddii aad dooneyso in degmooyinka oo dhan aad go'aanka dacwada ka diiwaan geliso waa inaad diyaarsataa oo aad haysataa qoraalo kugu filan oo ah go'aanka maxkamadda xukuntay kuwaas oo aad ka sameysaneyso maxkamadda dacwadaada dhageysatay. Inta badan, go'aanka maxkamadda waxa laga diiwaangeliyaa degmada uu degan yahay taas oo inta badan ah halka uu ku leeyahay guri.

Marka laga diiwaangeliyo degamada, waxa uu go'aanku deyn bixiyaha siinayaa inuu qeyb ku yeelan karo hantida qaameysanaha ee ku taal degmada laga diiwan geliyey.

Deyn bixiyaha oo xuquuq ku yeesha hantida qofka oo lagu helay amar maxkamadda laga diiwan geliyey waxa ay ku eg tahay muddo 5 sano ah. Haddii aanu qaameysanuhu weli bixin waxyaabihii ay maxkamaddu ku xukuntey waa in dib loo cusbooneysiiyaa oo maxkamadda mar kale laga diiwan geliyaa qoraal cusub taasoo deyn bixiyaha xuquuq uu ku yeelanayo hantida qaameysanaha.  In aad xuquuq ku yeelato hantida ma aha dariiqo aad ku heli karto lacagta aad ku leedahay qaameysanaha. Waa in aad xaraashtaa xuquuqda aad ku leedahay hantia si aad u hesho lacagtaada – waa adiga oo xaraashaya hantida oo kale. Xaraashka xuquuqda aad ku leedahay waxaa loo maraa dariiqo aad u adag, inta badan waxaa hawshaa loo qortaa oo qabta qareen (qof sadexaad oo ka qeyb qaata) waxaana suurto gal ah in laguu celiyo lacagta haddii uu hirgalo oo aad ku guuleysato inaad xaraashto xuquuqda aad ku leedahay hantida ma guurtada ah.

Si kastaba arrintu ha ahaatee, amar maxkamadeed oo sugaya in aad maslaxad ku leedahay hantida waa mid aad u wanaagsan. Haddii qaameysanuhu doonayo inuu iibiyo ama maal gelin ku sameeyo hanti waxa ay ku siineysaa in aad xuquuq aad ku leedahay inuusan hantida iibin karin ama dib u maalgelin karin isaga oo aan bixin deynta lagu leeyahay.

Haddii qaanta bixinteeda lagugu xukumey aad wada dhiibto iyadoo dhan, taasoo ay ku jiraan lacagta maxkamadda iyo dulsaarkaba, haddiiba ay jiraan, adiga ayaa mas'uul ka ah inaad ogaato in la baabi'iyey horey deyn bixiyaha loogu ogolaadey inuu qayb ku yeelan karo. Haddi qaanta lagugu lahaa lagu bixiyey iyada oo la gadey hanti ma guurto ah oo aad lahayd oo horey deyn bixiyaha loogu ogaadey in uu qeyb ku yeelan karo, deyn bixiyaha iibsadaha hantida ayaa isaga oo wakiil ka ah diiwaan gelinaya in la tirtirey hantidii deyn bixiyaha loo ogo laadey inuu qeyb ku yeesho.

## Maxaa yeelayaa haddii aan u doonayo in la iga gargaaro bixinta qaanta la igu xukumey?

Haddii aad ku jirto xaalad dhaqaale oo aad u adag, taasoo ka dhalatay dacwadda la diiwaan geliyey ee adiga liidiga ku ah ama sababo kale, waxa aad leedahay fursado dhawr ah: damaanad qaad, heshiis aad gaarto oo aad lacag ku bixineyso jadwal laguu dajiyey, mushaharkaaga oo laga gooyo si toos ah lacag aad horey u ogolaatey, ama in aad maxkamadda ka diiwaangeliso in aad cayroowday. Hase yeeshee, haddii ay xaaladdaas kula soo gudboonaato **waa in aad la tashataa dadka aqoonta u leh.** Shaqaalaha maxkamadda ayaa laga yaabaa in ay kuu sheegi karaan halka aad ka heli karto adeegaas dadka aqoonta u leh oo lacag la'aan ah. Hadalkan hoos ku xusan ee la soo koobay waa halkii bilowga talo soo jeedinta aad u baahan tahay.

Haddii aad bixin weyso lacagta ay maxkamaddu kugu xukuntey inaad bixiso, waxaa laguu soo dirayaa " warqadda codsiga 15 cisho" oo sidoo kale lagu magacaabo " Ogeysiiska Wargelinta

fulinta go'aanka maxkamadda" taas oo lagugu weydiisanayo inaad fuliso amarka maxkamadda. Waxaa kuu soo diraya warqaddan qofka loo xukumay ee ku guuleystay dacwada waana talaabada ugu horeysa ee maxakamadda lagu weydiisanayo inay ka caawinto sidii uu qofku ku heli lahaa dacwadda loo xukumay. Ogeysiiskan waxaa ka mid noqonaya faahfaahin ku saabsan damaanad qaadka iyo gaaritaanka heshiis jadwalaha oo aad ku bixiso qaanta lagugu leeyahay.
.

**Damaanad qaad** waa heshiis aad la gaarto dawladda hoose ama maxkamadda degaanka aad degan tahay (ama goobta aad ka shaqeyso haddii aadan deganeyn gobolka Ohio). Damaanad qaadku waa iyada oo qeyb ka mid ah dakhligaaga si siman loogu qeybiyo dadka deynta kugu leh (deymaha la ogsoon yahay inta lagugu leeyahay) ilaa deyntaas laga wada bixiyo.

√ Si aad xaq ugu yeelato in aad ka qeyb qaadan karto damaanad qaadka, waa in aad heshay oo lagu soo diraa warqad muddo 15 cisho ah lagaaga codsanayo in aad ku bixiso deynta lagugu leeyahay, taas oo ah talaabada ugu horeysa ee la doonayo in lacag looga gooyo dakhliga ku soo gala

√ Waxaa suurto gal ah in lagu weydiisto in aad bixiso lacag damaanad qaad ah oo inta badan ah boqolkiiba (tiro yar) lacagta laguu maamulay.

√ Hadii aad gasho heshiiska damaanad qaadka waxaa la joojinayaa in lacag laga soo jaro mushaharkaaga ka hor inta aadan qaadan isla markaana deyn bixiyuhu ma diiwaan gelin karo dacwad tan iyo inta qaameysanuhu u hogaansan yahay oo uu dhaqangelinayo heshiiska la gaarey. Hase yeeshee, deyn bixiyuhu waa uu ka hor imaan karaa in la sameeyo damaanad qaad.

√ Heshiiska kama hor istaagayo deyn bixiyaha inuu qaado talaabooyinka qaarkood. Tusaale ahaan, deyn bixiyuhu waxa ay codsan karaan amar maxkamadeed, waxa ay dib ugu noqon karaan maxakamadda, waxa ay magaoocda ku lifaaqi karaan ama iibin karaan hanti aaney maxkamaddu ka reebin ama ku cadeyn heshiiskii la gaarey..

**Heshiis lagu sameeyo jadwal qaan bixin** taasoo lagu abuuray adeegga talo siinta qaameysanayaasha ee u haysta ogolaansho sharci ah adeegga ay fidiyaan. Marka la soo koobo, qofka doonaya inuu sameeyo jadwal u ku qaanbaxo oo uu ku bixiyo deynta lagu leeyahay waa inuu la kulmaa wakiil ka tirsan hay'adaha la taliya qameysanayaasha si ay suurto gal u noqoto in heshiis la gaari karo. Haddii heshiis la gaaro, qaameysanahu waxa uu qeyb ka mid ah dakhligiisa ama dakhligeeda ku keydinayaa xisaab loo furey sida uu qabo heshiisku, ka dib hay'addan ayaad lacagta u qeybineysa deyn bixiyayaasha sidii heshiisku ahaa. Hay'adaha talo siisyada qaameysanayaasha intooda badan lacag kama qaadaan qaameysanayaasha adeegga ay u qabtaan.

√ Xaq waxa aad u leedahay in laguu sameeyo jadwal aad ku bixiso deynta lagugu leeyahay haddii aad heshey ama aadan helinba ogeysiis muddo 15 cisho ah lagaaga codsanayo in aad ku bixiso lacagta lagugu leeyahay.

√ Deyn bixiyayaasha iyaga ayaa si madax banaan uga qeyb qaata qorshaha lagu sameynayo jadwal loogu magdhabayo deynta ay ku leeyihiin qaameysanaha. Deyn bixiyuhu ma diiwaan gelin karo dacwad tan iyo inta qaameysanuhu u hogaansan yahay oo uu dhaqangelinayo heshiiska la gaarey.

√ Deyn bixiyayaasha ogolaadey in ay ka qeyb qaataan qorshahan waxa ay qaadi karaan talaabooyin kale oo xagga sharciga ah oo ay deynta ka maqan ku soo urursan karaan. Tusaale

ahaan, waxa ay lacag kala bixin karaan xisaabta bangiga ee qaameysanaha deyn bixiyayaasha qaarkood waxa ay magacooda ku lifaaqi karaana ama iibin karaan hantida qaameysanaha si ay u helaan xaqiijin maaliyadeed oo sugeysa in ay helaan deynta ka maqan.

Laba siyaabood oo kale ayaa jira aad ku heli karto wada shaqeynta maxkamadda dawladda dhexe

**Qorsheynta mushahar ka goynta** waxaa maamula maxkamadaha dawladda dhexe. Qorsheynta mushahar ka goynta waxa uu la mid yahay hay'ad dhexe oo qaameysanaha si joogta ah uga soo qaadda heshiiska maaliyadeed ee lacag bixinta ee uu horey u galay ilaa ay deynta dhamaato, deyn bixiyaha dibadda ayuu ka taagan yahay oo ma diiwaan gelin karo wax dacwad tan iyo inta uu qaameysanuhu ku taagan yahay balantii uu horey u galay.

**Cayroobid (Bankruptcies)** waa hab kale oo ay maamusho maxkamadda dawladda dhexe. Cayroob idda, waxaa la qeybiyaa hantida qaameysanaha inta deynta ku leh taasoo qaameysanaha laga daayo deynta lagu leeyahay oo dhan ka dib marka hantida qaameysanaha la qeybiyo, xitaa aaney hantidiisu ku fileyn in ay daboosho deynta lagu leeyahay.

## Xaggee ayaan ka heli karaa macluumaadka aan doonayo?

Inkasta oo qeybtan laga heli karo macluumaad  dheeraad ah, hadana ma jiro macluumaad soo koobeysa dhamaan ilaha laga heli karo macluumaadka aad u baahan tahay, tusaale ahaan, waxa aad la xiriiri kartaa qareen, waxa adaa la xiriiri karta adeegga isku xirka qareenada, ama adeegga xaga sharciga ee degaankaaga.

Haddii aad dooneyso macluumaad dheeraad ah ama gargaar dhinaca diiwaangelinta ah ama difaac dhageysiga maxkamadda qaansheegashada, ama ururinta lacag laguu xukumey, ama diiwaan gelinta in maxkamadda dawladda dhexe ay wakiil kaaga noqoto haddii dacwad lid ku ah la diiwaan gelinayo ama horey loo diiwaan geliyey   haddii aad maanka ku heyso in aad diiwaan geliso qorsheynta mushahar ka goynta ama in aad ceyroowdey, la xiriir qareen adeegga xiriirinta qareenada ama xafiiska adeegga sharciyada ee degaankaaga.



Somali (Translated November 2009)
Provided by the Interpreter Services Program of the Supreme Court of Ohio
The English version of this form and other information is available on the
http://www.supremecourt.ohio.gov/JCS/interpreterSvcs/forms

# Qodob muhim ah in la xusuusnaado:

**Macluumaadka ku xusan buug yarahan ma aha talo soo jeedin xagga sharciga ah oo uu bixinayo qof sharci yaqaan ah (qareen).**

**Shaqaalaha maxkamaduhu kuma siin karaa talo soo jeedin xagga sharciga ah.**

**Waa in aad ogaataa sharciyada iyo nidaamka maxkamadaha degaankaaga.**

**Sidoo kale waa in aad xasuusnaataa taariikhaha laguu qabto ee diiwaangelinta iyo dhageysiga dacwadaha.**

**Waa in aad ka soo baxdaa mas'uuliyadda ku saaran.**

**Waa in aad keydisaa nuqul ka mid ah dhamaan qoraalada aad ka diiwaan geliso maxkamadda.**

**Maxkamadaha dhageysata dacwadaha qaansheegashada waxa ay dhageystaan oo kaliya dacwadaha la xiriira lacago la isu heysto .**



Somali (Translated November 2009)
Provided by the Interpreter Services Program of the Supreme Court of Ohio
The English version of this form and other information is available on the
http://www.supremecourt.ohio.gov/JCS/interpreterSvcs/forms